

HORDHAC

Toban sanadood kahor waxa soo baxay wargees [jaraa'id]. La yiraahdo Hayaan oo wax ka Qora Arimaha Soomaalida iyo Soomaaliya, wargees aad u yar buu ahaa wuxuuna ahaa wargeeska kaliya arimaha Soomaalida waxka Qora, ilaa iyo bartamaha 2005 ta waxaa ay Qoreen Sagaal Qoraal ee kala duwan Sida Soomaalida ku nool Dunida daafaheed iyo noloshooda sidaay aheed wadanka ay kasoo tageen ama ay ka Qaxeen Soomaaliya, wargeeska Hayaan wargees aad u Qiimo badan buu ahaa.



Bartamaha 2008 dii Wargeesyada Nederland waxaa ay bilaabeen in ay Qoraalo iyo warbixino Soomaaliya ka sameeyaan, Qoraalkooda badidiisa wuxuu ku Saabsanaa burcad badeeka, maraakiib la afduubay iyo Lacag baad ah Lagaqaaday, Qoraalada Wargeesyadaan fafaahim fiican oo Qiimo Leh ma ay nan Laheen.

Sida awgeed waxa aynu go'aa ku gaarnay in aynu samayno, Qorno Wargees af Soomaali ee Arrimaha Soomaalida ka hadla. Waxaa aynu ku Faraxsanahay in aynu idin bandhigno Wargeeskan cusub ee la yiraahdo Geedi.

Qoraa Soomaaliyeed wuxuu yiri: "Waxaan Rajaynayaa in aad fahamtaan Buug goorta la Qoro si sahlan buu Warka buuga ku Qoran Dunida gaarayaa, Sheekada Buuga ku Qorana waxaa ay sababaysa dadka dunida kunool mar walba in ay xasuustaan, waxa xun, adigoo nool in lagu ilaabo".

Waxaa dadka ku Hawlan Qoraalka Wargeeska Geedi doonayaan in Soomaaliya iyo Soomaalida aanan la ilaabin, ee Dunida guud ahaan, Nederland gaar ahaan, dhaqanka, dagaalka ka soocda iyo guud ahaan Nolosha iyo Rajada umada Soomaaliyeed ee kunool Dunida daafaheeda.

Geedi waa Wargees Soomaaliya iyo Soomaalida wax ka Qora.